Diseembar 2023

# Suuragalminada Dhismaha Goleyaasha Degmooyinka iyo Dimuqraadiyeynta Maamulka Gobolka Banaadir

**Faallo Kooban:** SDP.03

# Tusmo


**Erayada Lasoo Gaabiyey** 3

**Soo koobid** 4

**Hordhac** 6

**1. Xaaladihii taariikheed** 7

Beddelidda joogtada ah ee hoggaanka iyo xaaladda siyaasadeed 7

Dhismihii golaha deegaanka ee sanadkii 2008 8

Amni-darradii muddadii Madaxweyne Shariif iyo Soo ifbixii khilaafkii u dhexeeyay DFS & DXDF 10

**2. Nooca maamul ee hadda ka jira Banaadir** 11

Arrimaha dhaqaalaha iyo siyaasadda ee Maamulka Gobolka Banaadir 11

Ka-gudbidda cakirnaanta maamul 13

**Gunaanad iyo talooyin** 18

Talooyin ku socda DFS, MGB, Baarlamaanka iyo Horjoogeyaasha siyaasadda 19

# Erayada Lasoo Gaabiyey

| | |
|---|---|
| **MGB** | Maamulka Gobolka Banaadir |
| **DFS** | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| **DXDF** | Dowladaha Xubinaha ka ah Dowladda Federaalka |
| **MMI** | Midowga Maxkamadaha Islaamka |
| **DGKB** | Dadka Gudaha Ku Barakacay |
| **GWQ** | Golaha Wadatashiga Qaran |
| **HQHC** | Hal Qof, Hal Cod |
| **DFKMG** | Dowladda Federaalka Kumeelgaarka |

# Soo koobid

- **Isbeddelka degdegga ah iyo khataraha amniga ayaa maamulka gobolka Banaadir ka dhigay mid aan xasilneyn.** Sameynta golaha deegaanka ee gobolka Banaadir (oo ka kooban 17 degmo) waxa ay ahayd howl aad u caqabado badan. Labaatankii sano ee lasoo dhaafay, hoggaanka sare ee Maamulka Gobolka Banaadir (MGB) oo si degdeg ah loo bedbeddelayay (ama hoggaan la'aan mararka qaar), loolan ka dhex-jiray beelaha dega gobolka iyo rajada kuwa u arka in magaaladu ay tahay caasimadda dalka, oo ay wehliso amni-darro daba-dheeraatay iyo khatarta lagala kulmayo al-Shabaab, ayaa adkeysay in la dhiso maamul xasilloon. Qormadan waxa ay sahmineysaa fursadaha uu heysto Maamulka Gobolka Banaadir ee la xiriira ballaarinta dimuqraadiyeynta iyo sameynta goleyaasha degmooyinka.

- **Joogitaanka dowladda federaalka iyo xiriirka dhinacyada badan ee u dhexeeya beelaha ayaa xaddidaya heerka la xisaabtanka muwaadiniinta ee MGB.** MGB ayaa udub-dhexaad u ah arrimo dowladeed oo isku dhafan, oo ay kamid yihiin Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) iyo beelaha deggan magaalada. Gaar ahaan, xaqiiqda ah in MGB uu DFS u yahay isha dakhli ee ugu muhiimsan ayaa waxa ay arrin muhiim ah u ahayd hoggaanka federaalka oo aan muujinin rabitaan ah in uu wareejinayo awoodaha maamul. Arrinkan waxaa sii xoojiyay awoodda hoggaanka dowladda federaalku u leeyahay magacaabista guddoomiyaha iyo ku-xigeennada MGB, taasoo dhalineysa qaab-dhismeed dowladeed oo aanay dadka deegaanku lahayn awood la-xisaabtan toos ah.

- **Xaaladda amni ee soo hagaagaysa iyo baaqyada Muqdisho ee la xisaabtanka iyo metelaadda ayaa xoojinaysa baahida ah in baarlamaanka uu go'aansado mid kamid ah saddexda hab-maamul ee Muqdishu loo soo jeediyay.** Hoos-u-dhaca ku yimid saameynta al-Shabaab iyo horumarka laga gaaray amniga Muqdisho ayaa sii kordhinaysa baaqyada ah in la dhiso gole deegaan oo lasoo doortay. Haddaba, waa in baarlamaanka uu ugu horreyn doortaa mid kamid ah saddexda xulasho oo ay soo jeediyeen hay'adaha arrimaha dastuurka kuwaasoo kala ah, in ay Muqdisho/Banaadir noqoto: 1) Degmo federaal; 2) Dowlad Xubin ka ah Dowladda Federaalka, ama 3) Magaalo madax ku dhex taalla dowlad-goboleed. Go'aanka mustaqbalka waa in uu ku saleysnaadaa iskaashi iyo qiimeyn dhab ah, halka uu ahaan lahaa fursad siyaasadeed taasoo horey u carqaladeysay dadaallada dib-u-habeynta.

- **Marka la eego su'aasha maqaamka, MGB waxa uu u ololeynayaa "Nooca Berlin" in uu noqdo maqaamka Muqdisho**, oo ah caasimadda Soomaaliya. Qaabkan, MGB waxa uu noqon doonaa dowlad-goboleed lamid ah dowlad-goboleedyada kale ee Soomaaliya oo metelaad ku filan ku leh labada aqal ee baarlamaanka, iyadoo sidoo kale ay Muqdisho sii ahaaneyso magaalo-madaxda dalka.

- **Maamulka Gobolka Banaadir ee hadda jira waxa uu door bidayaa in la dhiso qaab-dhismeed gobol oo cusub**, iyagoo aaminsan in uu yahay waddo fudud oo la hirgelin karo taasoo la jaan-qaadaysa hannaanka awood-qeybsiga beelaha ee ka jira Gobolka Banaadir, oo hoy u ah in ka badan labo milyan oo qof. Habkani, marka loo eego MGB, ma aha mid faa'iido u leh oo kaliya laakiin sidoo kale ujeedadu waa in uu horseedo isbeddel lagu sameeyo nidaamka maamul, si loo hubiyo sii socoshada iyo xasilloonida gudaha ee bulshada gobolka.

- **Dib-u-habeyn maamul ee ballaaran ayaa u baahan doonta tixgelinta hab dhinacyo badan leh oo ku lug leh qaab-dhismeed sharci oo adag, rabitaan siyaasadeed ee doorashooyinka degmooyinka, iyo dib-u-dejin dakhli oo hufan suuragalna ah.** Waxa ay sidoo kale la macno tahay hubinta in metelaad ay helaan bulshada deggan Muqdisho—oo ay ku jiraan dadka gudaha ku barakacay—iyo dhammaan dadka Soomaaliyeed ee u arka in Muqdisho ay tahay caasimaddooda. Marka taariikhda dib loo eego, isku-daygii 2008 ee dhismaha golaha deegaanka—oo loo arko qaab loo wada dhan yahay, oo la qaabeeyay iyadoo ay jireen qalalaase baaxad leh—ayaa noqon kara bar bilow.

- **Baahida loo qabo dimuqraadiyeynta Gobolka Banaadir waa mid la taaban karo, iyadoo dastuurka, nuucyada horey loo tijaabiyey iyo dareenka dadweynuhu ay dhammaantood u janjeeraan dhinacan.** Haddaba waa in diiradda la saaraa qorshe hufan iyo istaraatiijiyado wax-ku-ool ah oo hubinaya in isbeddel dimuqraadi ah uusan dib-u-dhac ku imaan ama la kulmin dhibaatooyin laga baaqsan karo.

# Hordhac

Sameynta golaha deegaanka ee gobolka Banaadir (oo ka kooban 17 degmo)[1] waa howl aad u caqabado badan, taasoo sabab ay u tahay xaaladaha cakiran ee taariikh, siyaasad, dhaqan-dhaqaale iyo amni ee magaalada. Qormadaan waxa ay sahminaysaa fursadaha uu heysto Maamulka Gobolka Banaadir (MGB) ee sameynta goleyaasha degmooyinka. Halkan, 'sameynta goleyaasha degmooyinka' waxaa loola jeedaa yegleelidda hannaan maamul oo heshiis lagu yahay, isla-xisaabtan leh sidoo kalena sharci ku dhisan—taas ayaana la dhihi karaa waxa ay ahayd mushkiladda siyaasadeed ee ugu weyneyd ee soo wajahday gobolka Banaadir labaatankii sano ee lasoo dhaafay.

MGB ayaa udub-dhexaad u ah arrimo dowladnimo dhinacyo badan leh oo isku xiran— oo ay kamid yihiin Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) iyo dhaqdhaqaaqyada beelaha deggan magaalada—taasoo dhalisay caqabado gaar ah oo salka ku haya nuglaanta iyo taariikda burburka dowladeed. Waxaa xaaladda ugasii daray maqaamka Banaadir/Muqdisho ee mugdiga ku jira ee nidaamka federaalka, maadaama aanay ahayn dowlad-goboleed, sidoo kalena aanay ahayn farsamo ahaan caasimad qaran. Dhibaatadan aqoonsi ayaa dhalisay wada-hadallo dhowr ah iyo muran badan oo la xiriira maamulka, laga billaabo sida ugu wanaagsan ee wax looga qaban karo baahiyaha ku dhawaad 2.5 milyan oo qof oo magaalada deggan, ilaa kheyraad iyo awood qeybsiga ka dhexeeya dowladda hoose iyo midda qaranka.

Isbeddellada soo noqnoqda oo degdegga ah ee hoggaanka ayaa culeys kale ku ah cakirnaanta arrimahan. Intii u dhexeysay 2000 ilaa 2023,[2] Gobolka Banaadir ayaa yeeshay 13 guddoomiye. Intaa waxaa dheer, muddo kamid ah wakhtigan, Muqdisho waxay ahayd meel aan la xukumin, sababtoo ah waxaa joogay hoggaamiye-kooxeedyo ama al-Shabaab, oo ay weheliso wada-xaajoodyadii nabadeed ee daba-dheeraaday ee ka dhacayey dalka dibaddiisa.3 Isbeddelkan hoggaan ee degdegga ah (ama hoggaan la'aanta jirtay xilliyada qaar) ayaa adkeysay sameynta maamul xasiloon.

Sidoo kale, gobolka Banaadir waxa uu labaatankii sano ee lasoo dhaafay wajahayay amni-darro daba-dheeraatay, oo ay kamid yihiin khatarta iyo weerarrada joogtada ah ee uga imaaneysa al-Shabaab. Tani keliya ma saameynayso nolol maalmeedka dadka caadiga ah, balse waxay xaddidaysaa fursadaha lagu sameyn karo dib-u-habeyn siyaasadeed oo dhab ah, iyo hagaajinta maamulka. Natiijo ahaan, dadka deggan magaaladu ma helaan—sida ay sheegeen madaxdii hore ee MGB iyo dowladda federaalka ee lagu wareystay daraasaddan—adeegyada muhiimka ah ee ay mudan yihiin.[4] Sikastaba ha ahaatee, waxaa soo ifbaxaya ifafaalo muujinaya in xaaladda amni ee Muqdisho ay soo hagaageyso tan iyo markii Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud mar kale dib loo doortay bishii May 2022.[5] Marka la eego nabadda iyo xasiloonida jirta, xilligan la joogo waxaa loo arkaa waqti ku habboon in dimoqraadiyeyn ballaaran lagu sameeyo gobolka Banaadir.

1 Warbixintan oo dhan, 'Muqdisho' iyo 'Banaadir' macnahooda waa isku mid.

2 Mohamed Warsame, 'Akhriso Liiska Magacyada 47 Duq Magaalo oo soo maray Magaalada Muqdisho', Caasimada Online, 27 January 2018. Accessed 6 September 2023, www.caasimada.net/akhriso-liiska-magacyada-47-duq-magaalo-oo-soo-maray-magaalada-muqdisho/.

3 2000-2002, qabqablayaal dagaal ayaa kala bar maamulayay magaalada Muqdisho, haddaysanba ka badnayn; 2002-2004, wada-xaajood ayaa ka dhacay Mbagathi iyo Eldoret Kenya; 2009-2012 Al-Shabaab ayaa gacanta ku heysay inta badan magaalada. Wixii markaas ka dambeeyay, dowladda federaalka ayaa inta badan gacanta ku heysay magaalada iyadoo kaashanaysa ciidamo nabad-ilaalin.

4 Marcel Dyama, 'Political economics of war and peace in Somalia', AgroPolis International, October 2007. https://agritrop.cirad.fr/549241/1/document_549241.pdf.

5 Friday at the beach in Mogadishu: Optimism shines through despite Somalia's woes; NPR, 20 January 2023; https://www.npr.org/sections/goatsandsoda/2023/01/20/1149831181/friday-at-the-beach-in-mogadishu-optimism-shines-through-despite-somalias-woes

# 1. Xaaladihii taariikheed

Isbeddelka hoggaamineed ayaa muddo dheer caqabad ku ahaa dadaalladii gobolka Banaadir loogu raadinayey maamul iyo dib-u-habeyn dimoqraadi ah. Ka hadlidda arrimahan ayaa muhiim ah marka ay timaaddo qiimeynta suurtagalka ah ee dhismaha goleyaasha degmooyinka. Intii u dhexaysay 1991 ilaa 2000, Muqdisho waxa ay ahayd magaalo hantida ma guurtada ah lagu loollamo, qabqablayaal dagaal iyo hoggaamiye kooxeedyo kala duwan ayaa magaalada kala qeybiyey.[6] Wixii ka dambeeyay wakhtigaas, dowlado kumeelgaar ah oo tabar daran ayaa—inta badan—Muqdisho/Banaadir ka dhigtay fadhigooda. MGB ayaa la kulmay isbedello degdeg ah oo dhanka maamulka ah, iyadoo ay yareyd in uu guddoomiyaha gobolka xafiiska joogo muddo ka badan hal sano. Joogteyn la'aan, maamul wanaag oo aan jirin iyo hogaamiyeyaal aanan aqoon badan u lahayn deegaanka ayaa saameyn ballaaran ku yeelatay gobolka, taasoo carqaladeysay dhismaha goleyaasha deegaanka meeshana ka saartay kalsoonidii bulshadu ku qabi lahayd hogaanka.

## Beddelidda joogtada ah ee hoggaanka iyo xaaladda siyaasadeed

Intii u dhexeysay 2000 iyo 2023, beddelaadda joogtada ah kuma koobneyn keliya duqa magaalada/guddoomiyaha,[7] balse guddoomiyeyaasha degmooyinka ee 17-ka degmo ayaa sidoo kale la bedbeddelayay. Sababo la xiriira burburkii, colaadihii hore iyo amni xumada awgood, shakhsiyaadka loo magacaabayay xilka guddoomiyaha gobolka iyo kuwa degmooyinka ayaa kasoo jeeday hal beel. Xaaladdani ayaa si tartiib tartiib ah isku beddeleysa: hadda, ugu yaraan shan (kamid ah 17-ka) guddoomiye degmo ayaa kasoo jeeda beelaha aan ku xoogganeyn Muqdisho. Sidoo kale, marka la eego in madaxweynaha federaalka uu leeyahay awoodda magacaabista guddoomiyaha gobola Banaadir, hoggaanka gobolku waxa uu leeyahay madax-bannaani xaddidan. Sidaa si la mid ah, gudoomiyeyaasha degmooyinka, ee uu magacaabo gudoomiyaha gobolka Banaadir, waxa ay ka danbeeyaan madaxdooda xilka u magacowday.

Muddadii uu socday shirkii nabadda iyo dib-u-heshiisiinta ee Mbagathi (Kenya) (2002-2005), maamulka Muqdisho/Banaadir waxa uu ahaa mid magac u yaal ah ama aan jirin. Inkastoo shirkaas uu horseeday dhismihii Dowladdii Federaalka Kumeelgaarka ahayd ee Madaxweyne Cabdullaahi Yuusuf ugu sarreeyay, maamulka cusub ayaa la kulmay caqabado waaweyn—oo ay kamid yihiin mucaaradnimada hoggaamiye kooxeedyo iyo sharci la'aan guud—taasi oo soo dedejisay in madaxda qaranka ay go'aansadaan in aysan ku shaqeyn caasimadda. Muddo sanad ah, DFKMG waxay joogtay Jowhar (oo 90 km waqooyi ka xigta Muqdisho), kahor inta aysan u guurin Baydhabo (oo 250 km u jirta Muqdisho) kadib markii ay isku dhaceen Islaamiyiin iyo hoggaamiye

6 Eeg, tusaale ahaan, Diana Jean Schemo, 'Somali Warlord's Supporters On Rampage for Second Day', *The New York Times*, 26 February 1993. Accessed 18 September 2023, www.nytimes.com/1993/02/26/world/somali-warlord-s-supporters-on-rampage-for-second-day.html.

7 Marka la eego in 17-ka degmo ee Muqdisho ay la mid yihiin guud ahaan gobolka Banaadir, mas'uulka ugu sarreeya waxaa la siiyay laba darajo oo ah guddoomiyaha gobolka Banaadir iyo duqa Muqdisho. Sikastaba ha ahaatee, waxaa jiray xilliyo, gaar ahaan, xilligii Ziyad Barre iyo dowladdii KMG ahayd ee la aas-aasay 200, labo qof loo loo kala magacaabay labada xil. Laga soo bilaabo 2004, booska duqa iyo guddoomiyaha waxaa isku qabanayay hal masuul;

kooxeedyadii markaas ahaa wasiirro aan ku qanacsaneyn hoggaanka DFKMG oo ay ka tirsanaayeen.[8]

Sikastaba ha ahaatee, muddadani waxaa la sameeyay dadaalladii ugu horreeyay ee si aan toos ahayn loogu dooranayo duqa Muqdisho iyo guddoomiyaha gobolka Banaadir. Sanadkii 2005, xildhibaanno iyo wasiirro (isugu jiray qabqablayaal hore iyo hoggaamiye kooxeedyo) oo kasoo jeeda beesha tiro ahaan ugu badan Muqdisho, ee Hawiye,[9] ayaa isugu yimid caasimadda si ay markii ugu horreysay u sameystaan hoggaan mideysan tan iyo markii uu dagaalladii sokeeye billowday sanadkii 1991.[10] Dhanka kale, Madaxweyne Cabdullaahi Yuusuf (2004-2008), oo kasoo jeeda Puntland, ayaa diiday in uu Jowhar kasoo safro ee uu yimaado Muqdisho sababo amni iyo kuwo siyaasadeed awgood. Si looga gudbo caqabadaas, loona oggolaado in DFKMG ay ka hawlgasho meel ka baxsan magaalada Muqdisho, siyaasiyiintii Hawiye (oo ay u badanyihiin xildhibaano ahaan jiray hogaamiye kooxeedyo)—oo ay taageerayaan ganacsatada, bulshada rayidka, iyo hoggaanka beelaha—ayaa aad ugu dadaalay sidii ay ula imaan lahaayeen hannaan magaalada loogu sameyn karo maamul, iyagoo abuuraya hab ay beelaha Muqdishu ku badan awoodda u qeybsadaan. Dadaalladaasi ayaa noqday kuwo aan miro dhalin, maadaama hogaamiye kooxeedyadii ay ku heshiin waayeen awood qeybsiga.

Bishii Juun 2006-dii, Midowgii Maxkamadaha Islaamka ayaa magaalada Muqdisho kula dagaalamay hogaamiye kooxeedyadii gacanta ku hayay magaalada tan iyo sanadkii1991, iyagoo magaalada nabad ka dhaliyay markii ugu horeysay muddo soddon sano ah.[11] Lixdii bilood ee xigtay, Midowgii Maxkamadaha Islaamka waxa ay maamulayeen magaalada,[12] kahor inta aysan magaalada ka saarin ciidamadii Itoobiyaanka ee soo galay Soomaaliya iyagoo taageeraya madaxweynihii DFKMG.[13] Tani waxay soo dedejisay dagaalladii lagu dhamaaday oo ugu dambeyntiina horseeday soo bixista al-Shabaab.

## Dhismihii golaha deegaanka ee sanadkii 2008

Dowladdii Federaalka Kumeelgaarka ayaa gashay jahwareer iyo dagaal dhexdeeda ah sanadkii 2008[14]—Madaxwayne Yuusuf ayaa ugu dambeyntii iscasilay Disembar 2008—iyadoo dowladdii federaalka kumeelgaarka ahayd ku qasbanaatay in ay dib ugu laabato Baydhabo maadaama ay muqaawamadii dagaallo kala kulmeen Muqdisho. Hase yeeshee, xilligan uu khalalaasaha badan jiray ayay ahayd markii Ra'iisal Wasaare Nuur Cadde uu hormuud ka

8 'Calls for patriotism as MPs meet in Baidoa', The New Humanitarian, 27 February 2006. Accessed 5 September 2023, www.thenewhumanitarian.org/report/58265/somalia-calls-patriotism-mps-meet-baidoa.

9 Tiro ahaan, Beesha Hawiye ayaa ah beesha ugu badan Muqdisho, maadaama dad badan oo degenaa baadiyaha iyo magaalooyinka kale ee bartamaha Soomaaliya (hadda ah Hirshabelle iyo Galmudug)ay caasimada u soo guureen. Beesha dhexdeeda, si kastaba ha ahaatee, saddex beelood ayaa si aad ah uga dhaqaale iyo metelaad siyaasadeed badan kuwa kale: Abgaal, Habar Gidir iyo Murusade.

10 Tan iyo burburkii dawladnimada waxaa magaalada kala qeybiyey hogaamiye kooxeedyadii iyo qabqablayaashii dagaal.

11 Xan Rice, 'Islamic militia ends Somali warlords' rule', *The Guardian*, 6 June 2006. Accessed 5 September 2023, www.theguardian.com/world/2006/jun/06/mainsection.international1.

12 Wareysi telefoon oo lala yeeshay sarkaal sare oo Midowga Maxkamadaha katirsanaa, 5 Sebtembar 2023.

13 'Ethiopian troops enter Somalia', Al Jazeera, 21 July 2006. Accessed 6 September 2023, www.aljazeera.com/news/2006/7/21/ethiopian-troops-enter-somalia.

14 Mohamed Ahmed, 'Somali president quits', Reuters, 29 December 2008. Accessed 5 September 2023, www.reuters.com/article/us-somalia-president-idUSTRE4BS0TG20081229.

ahaa dhismaha golaha deegaanka ee gobolka Banaadir.[15] Golaha deegaanka cusub oo markii hore haystay muddo-xileed afar bilood oo kaliya ah ayaa loo xilsaaray inay kor kala socdaan ammaanka magaalada iyo inay ka shaqeeyaan soo laabashada kumanaanka shacabka ah ee ka qaxay magaalada Muqdisho muddadii dagaalladu socdeen.[16] Sababta golahan loo siiyey muddo gaaban ayaa ahayd wada-xaajoodkii ka socday Jabuuti ee u dhexeeyay DFKMG ah ee kala qeybsaneyd oo dhinac ah iyo Islaamiyiintii iyo wadaniiyiintii loo yaqaannay Isbaheysiga Dib-u-xoreynta Soomaaliya. 26kii Nofembar, ARS iyo DFKMG waxay ku heshiiyeen abuuritaanka ‘dawlad midnimo qaran.’ Shariif Sheekh Axmed ayaa loo doortay madaxweynaha cusub 31-kii Janaayo 2009-kii waxa uuna ra’iisul wasaare u magacaabay Cumar Cabdirashiid Cali Sharma’arke 13kii Febraayo ee sanadkaas.[17] Xukuumadda Sharma’arke ayaa xilka la wareegay 27-kii bishii Febraayo, sidaas darteed hoggaanka cusub ee Muqdisho loo dhiibay waxaa loo dhiibay howlo gaar ah si ay u buuxiyaan firaaqa u dhexeeya xilliga kala guurka, isla markaana ay la wareegaan mas’uuliyadda amniga iyo soo celinta dadkii magaalada uga qaxay dagaallada.

Inkastoo Ra’iisal Wasaare Nuur Cadde iyo Madaxweyne Cabdullaahi Yuusuf oo si wadajir ah u daah-furay golihii la doortay ee Gobolka Banaadir, ay si weyn isugu maandhaafeen arrimo dhowr ah oo dalka khuseeya, haddana aragtidooda ku wajahan Gobolka Banaadir waxa ay ahayd mid aad u ballaaran: kaliya ma ahayn in ay raadinayeen hoggaan si dimoqraadi ah loo soo doortay, balse waxay sidoo kale raadinayeen hoggaan isku qabta baahiyaha gaarka ah ee bulshooyinka deegaanka iyo dareenka guud ee dadka Muqdisho u arkayay inay tahay caasimadda qaranka. Si taas loo gaaro, madaxdii TFG-da ee kala jabtay curdinkana ahaa waxay guddoomiye ku meel gaar ah u magacaabeen Ibraahim Sheekh Muxudiin oo ahaa ganacsade horena u ahaa sarkaal ciidan, iyagoo u xil saaray inuu soo saaro gole la soo doortay.

Golahan oo ka koobnaa 69 xubnood ayaa waxaa loo qorsheeyay in uu isku dheelitiro metelaadda beelaha iyo ilaalinta astaanta qaranka. Beesha Hawiye, oo qaarkood isu arka in ay ku abtirsadaan magaalada Muqdisho (Mudulood/Abgaal), ayaa guud ahaan ugu badan dadka deggan magaalada, waxaana loo qoondeeyay 47 kursi. Beelaha kale sida Daarood, Dir, iyo Digil-Mirifle ayaa min shan kursi la siiyay, halka guud ahaan 7 kursi la siiyay beelaha tirada yar (sida Banaadiriga asal ahaan Carabta ah) oo iyagana loo arko in ay asal ahaan kasoo jeedaan magaalada.[18] Xubnaha golaha deegaanka waxaa la dhaariyay 23-kii Nofeembar 2008, iyadoo guddoomiye/duqa magaalada iyo labo ku xigeen isla maalinkaas doortay.[19]

Sameyntii golaha deegaanka ee sanadkii 2008 waxay ahayd isbeddel wanaagsan oo soo maray taariikhda dhow ee maamulka Muqdisho. Marka lagasoo tago in ay ahayd howl muhiim u ah maamulka dowladda hoose, waxay ahayd muuqaal midnimo, maamul wadaag iyo mas’uuliyad wadareed ee dhinacyada dowladda, beelaha iyo siyaasiyiinta. Inkastoo golaha deegaanka

15 ‘Golaha Deegaanka Gobolka Banaadir oo loo kordhiyay muddo 2-sano iyo bar ah inay sii shaqeeyaan’, SomaliSwiss Media, 19 March 2009. Accessed 19 September 2023, https://somaliswisstv.com/2009/03/19/golaha-deegaanka-gobolka-banaadir-oo-loo-kordhiyay-muddo-2-sano-iyo-bar-ah-inay-sii-shaqeeyaan/.

16 ‘Golaha Deegaanka Gobolka Banaadir oo Waqtiga jiritaankiisa kororsaday’, Hiiraan Online, 19 March 2009. https://hiiraan.com/news/2009/mar/wararka_maanta19-6032.htm.

17 Somalia's new government to hold first cabinet meeting over the weekend; ReliefWeb, 27 February 2009; https://reliefweb.int/report/somalia/somalias-new-government-hold-first-cabinet-meeting-over-weekend

18 Todobadaas kursi afar kamid ah waxaa loo qoondeeyay beelaha Banaadiriga, Faaris iyo kuwa kale ee isku-dhafan ee badmaaxiinta ah.

19 ‘Xildhibaanno uu yeelanayo Gobolka Banaadir oo Muqdisho lagu dhaariyay’, Hiiraan Online, 23 November 2008. Accessed 18 September 2023, https://hiiraan.com/news/2008/nov/wararka_maanta23-5128.htm.

lagu dhisay xaalad xasillooni-darro iyo rabshado badan, haddana waxa uu ku guulaystay golehaas in uu shaqeeyo muddo sanad ku dhow iyadoo ay baddaleen maamul cusub. Guushan taariikhiga ah waa in ay astaan u noqoto adkeysiga Muqdisho, iyo sidoo kale awoodda ay dadku u leeyihiin in ay wax ka qabtaan baahiyahooda dowladnimo iyadoo ay jiraan duruufo aad u adag.

## Amni-darradii muddadii Madaxweyne Shariif iyo Soo ifbixii khilaafkii u dhexeeyay DFS & DXDF

Sanadkii 2009, Shariif Sheekh Axmed oo ahaa hoggaamiyihii muqaawamadii Islaamiyiinta ayaa noqday madaxweynaha DFKMG. Bartamihii sanadkii 2010, al-Shabaab, oo ahaa garabka xagjirka ah ee muqaamadada oo maamulayay 80% magaalada Muqdisho, ayaa magaalada u beddelay goob dagaal. Waxaa la sheegay in dowladda federaalka KMG ah ay gacanta ku haysay keliya degmooyinka u dhow Madaxtooyada, garoonka diyaadaha iyo dekadaha kuwaa oo ay AMISOM ilaalinayeen.[20] Muddadii ka hartay wakhtigiisii (ilaa sanadkii 2012), Madaxweyne Shariif Sheekh Axmed wuxuu waqtigiisa ku bixiyey dhameystirka dastuurka kumeelgaarka ah iyo la dagaalanka al-Shabaab, taasoo keentay in tixgelin yar la siiyo yegleelidda maamullo deegaan oo dimoqraadi ah. Intaa wixii ka dambeeyay, al-Shabaab keliya khalkhal ma gelinin magaalada, balse waxay diiradda ka weeciyeen dhisidda haykal dowladeed ee mustaqbalka fog shaqeeya.

Sanadkii 2012, dastuur cusub oo kumeelgaar ah ayaa qeexay in Soomaaliya ay si rasmi ah u qaadatay nidaamka federaalka. Sidaas darteed, dowladdii kumeelgaarka ahayd ayaa isku badashay Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS). Bilowgii, sikastaba ha ahaatee, wax badan isma beddelin, iyadoo Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud uu waqtigiisa xafiiska (2012-2017) ku dhameystay xoreynta magaalooyinka waaweyn ee koonfurta iyo bartamaha iyo dhismihii dowlad-goboleedyada.[21] Sidoo kale, sanadihii dambe ee Madaxweyne Xasan Sheekh iyo dhammaan muddadii Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Farmaajo (2017-2022) waxaa dowladda hareeyay khilaafyo siyaasadeed oo u dhexeeyay DFS iyo dowlad-goboleedyada. Khilaafyadan ayaa sababay isku-daygii DFS ee ahaa in ay meesha ka saarto madaxda dowlad-goboleedyada, laguna beddelo shaqsiyaad saaxiib la ah dowladda dhexe, taasoo keentay in ay iska caabin kala kulmaan dowlad-goboleedyada sida Jubbaland iyo Puntland.[22] Khilaafka u dhexeeyay DFS iyo dowlad-goboleedyada ayaa caqabad dheeraad ah ku kordhiyay hannaanka dowlad-dhis ee Soomaaliya: maadaama dowlad-goboleedyada ay maamul ahaan ka fogaadeen dowladda federaalka, sidaas darted, ma jirin dhiirrigelin weyn oo ay DFS ku bilowdo dib-u-habeynta arrimaha maamul ee Gobolka Banaadir.[23]

20 Katherine Zimmerman, 'Looking Ahead in Mogadishu: Tough Decisions', Critical Threats, 1 November 2010. Accessed 5 September 2023, www.criticalthreats.org/analysis/looking-ahead-in-mogadishu-tough-decisions.

21 Puntland waxay jirtay kahor inta aan la dhisin dowladda federaalka, si lamid ah Jubbaland, inkastoo Madaxweyne Xasan Sheekh uu ku dhawaaqay in qaabkii loo dhisay Jubalan uu ahaa 'mid aan sharci ahayn'. Saddexda dowlad-goboleed ee kale ee la dhisay muddadan ayaa kala ah Hirshabeelle, Galmudug iyo Koonfur Galbeed.

22 Inkastoo Hirshabeelle, Koonfur Galbeed iyo Galmudug ay iska caabiyeen balse ugu dambeyntii Madaxweynaha DFS ayaa ka guuleystay oo madax uga dhigay siyaasiyiintii uu rabay.

23 Ra'iisul Wasaarihii hore ayaa soo xigtay Madaxweyne dowladdii kumeelgaarka oo ku jawaabay, mar la weydiiyay sababta uu u dhisi waayay gole deegaan: 'Haddii aan gole deegaan sameyn lahayn, haddaan nahay madaxda dowladda federaalka, halkee ayaan maamuli lahayn?

# 2. Nooca maamul ee hadda ka jira Banaadir

Hoggaanka Maamulka Gobolka Banaadir waxaa iska leh guddoomiyaha gobolka, oo isla markaana ah duqa Muqdisho.[24] Taariikh ahaan, Guddoomiyeyaasha/duqa—oo u badnaa beelaha Muddulood—waxaa magacaabi jiray Madaxweynaha Qaranka/Federaalka, iyadoo madaxweynayaasha qaarkood ay soo magacaabeen ilaa saddex duq magaalo kala duwan muddadii ay xilka madaxweynaha hayeen.[25] Sidoo kale, xubno katirsan beesha Hawiye iyo beesha Banaadiriga ayaa loo magacaabaa saddexda guddoomiye ku xigeen.

Gobolka Banaadir waxa uu ka kooban yahay 17 degmo oo mid walba uu maamulo guddoomiye degmo iyo ku xigeenno ay tiradoodu ku xiran tahay baaxadda degmada.26 Xubnaka ka hoos shaqeeya guddoomiyaha degmada waxaa kamid ah xoghaye guud oo ciyaara kaalinta isu-duwidda howlaha. Marka ay timaado bixinta adeegyada, Maamulka Gobolka Banaadir ayaa sidoo kale leh agaasimeyaal mas'uul ka ah adeegyo kala duwan, laga billaabo waxbarashada iyo caafimaadka ilaa waddooyinka iyo amniga. Heer degmo, waaxyaha ayaa leh gudoomiye waaxeed, ku-xigeenno iyo xoghayeyaal, kuwaasoo ay soo magacaabaan guddoomiyeyaasha degmooyinka.[27]

## Arrimaha dhaqaalaha iyo siyaasadda ee Maamulka Gobolka Banaadir

Xiriirka ka dhexeeya DFS iyo MGB waa mid dhinacyo badan, waxayna ka muuqataa isku-dhexjirka arrimaha maaliyadeed, mudnaanta siyaasadeed iyo caqabadaha la xiriira maamulka. Mid kamid ah qodobada ugu waaweyn ayaa ah ku tiirsanaanta dhaqaale ee DFS ay ku tiirsan tahay gobolka Banaadir, iyadoo dakhliga ugu badan ee kasoo xarooda gudaha ay ka hesho dowladda federaalka dekedda iyo garoonka diyaaradaha ee Muqdisho, iyo canshuuraha ay bixiyaan dadka deggan magaalada.[28] Xubin katirsanaa golihii hore ee gobolka, ayaa sheegay: 'Dakhliga iyo wadaagga dhaqaalaha ee u dhexeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Maamulka Gobolka Banaadir uu yahay mid cadaalad darro ah… Waa in la dejiyaa nidaam wadaag-dakhli dheellitiran oo caddaalad ah si loo helo horumar iyo xasilooni loo siman yahay.[29]

24 Lagasoo bilaabo 2000 ilaa 2004, kaalinta guddoomiyaha iyo duqa magaalada way kala duwanaayeen, taasoo sidoo kale jirtay xilligii taliskii Siyaad Barre (1969-1991).

25 Waxaa ka duwanaa Maxamed Cismaan Cali (Dhagaxtuur), oo soo noqday guddoomiye/Duqa magaalo intii u dhexeysay November 2008 iyo Noofambar 2009.

26 Mararka qaarkood hal qof ayaa haystay labada boos ee siyaasadda iyo amniga; waqtiyo kale, shaqsiyaad kala duwan ayaa haystay labada boos. Wareysi lala yeeshay xoghayihii hore ee G/Banaadir, [Muqdisho], [23 Sebtembar 2023].

27 Wareysi lala yeeshay xoghayihii hore ee G/Banaadir, [Muqdisho], 18 Sebtembar 2023; Habka loo maray magacaabista gudoomiyaasha degmooyinka wuxuu ku salaysanaa sharciyo 1964/5 iyo 1969/70 oo qeexaya kaalinta Xoghayaha Guud. Sharcigu waxa uu dhigayaa in Duqa/Gudoomiyaha Gobolka uu usoo jeedinayo magacaabista Gudoomiyaasha Degmooyinka iyo Ku Xigeennada Wasiirka Arrimaha Gudaha oo markaas magacaabaya guddoomiyeyaasha iyo Ku Xigeennada. Boosaska ka hooseeya guddoomiyeyaasha degmooyinka iyo Ku Xigeenanda Duqa Magaalada ayaa magacaabaya sida guddoomiyeyaasha 'Waaxyada' iyadoo gudoomiyeyaasha degmooyinka ay magacaabayaan guddoomiyeyaasha 'Laamaha' iyo wixii ka hooseeya. Sikastaba ha ahaatee, wixii ka dambeeyay Janaayo 2018 nidaamkani wuu isbeddelay waxaana gudoomiyayaasha ay magacaabaan guddoomiyeyaasha degmooyinka iyo ku xigeennadooda oo ay ku jiraan 'waaxyada'.

28 'Ku saabsan Banaadir', Maamulka Gobolka Banaadir. Accessed 20 September 2023, https://bra.gov.so/about-benaadir/.

29 Wareysi lala yeeshay xubin hore ee golaha deegaanka G/Banaadir (2008–2012), [Muqdisho], 8 Sebtembar 2023.

Dareenkaas oo kale waxaa muujiyay mas'uul sare oo hore uga tirsanaa MGB, kaasoo sheegay in DFS ay canshuuraha uga qaado Gobolka Banaadir si lamid ah lacagaha uu Al-Shabaab qaado—iyagoo u arka in magaalada ay tahay 'sac irmaan oo caano badan' oo kale.[30]

Muhiimadda dakhli ee uu Maamulka Gobolka Banaadir u leeyahay dowladda federaalka ma aha mid la yareysan karo: waxaa ugu horreyn sabab u ah in ku-tiirsanaantan maaliyadeed awgeed aanay afartii madaxweyne ee ugu dambeeyay ee Soomaaliya muujinin rabitaan ah in ay ka shaqeeyaan doorasho ka dhacda gobolka Banaadir ama ay awoodda maamul ku wareejinayaan gobolka Banaadir. Xaaladdan soo noqnoqoneysa ayaa muujineysa in danaha dhaqaale ay ka hormarinayaan dadaallada dimuqraadiyeynta, taasoo caqabad ku ah rajada dhismaha goleyaasha deegaanka iyo dimoqraadiyeynta ballaaran. Si muwaadiniintiisa uu ugu abuuro kalsooni iyo daah-furnaan dheeraad ah, hoggaanka BRA waa inuu xaqiijiyaa in lacagaha loo isticmaalo si cadaalad ah oo ay yeeshaan kormeer dhaqaale iyo hufnaan. Tan waxaa ka mid ah habab dabagal adag oo banaanka ka yimaada iyo awoodda maaraynta maaliyadeed ee habboon.

Arrin kale oo kamid ah xiriirka dowladda federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir ayaa ku saleysan awoodda siyaasadeed ee ay hoggaanka federaalka u leeyihiin magacaabista guddoomiyaha iyo ku-xigeennada gobolka Banaadir. Nidaamkan magacaabista ayaa abuuraya haykal dowladeed oo aan lahayn isla xisaabtan toos ah oo dadka deegaanku leeyihiin.[31] Mid kamid ah guddoomiyeyaashii hore ayaa yiri:

Waa in ay DFS qaadataa hab iskaashi ah oo lagu qaabeynayo siyaasadaha maamul ee gobolka Banaadir, iyadoo la dheelitirayo isku-duwidda howlaha qaranka iyo madax-bannaanida gobolka. Iyadoo saameynta DFS ay weli lama huraan u tahay ilaalinta wadajirka guud ee dalka, waa inaysan baabi'in awoodda uu MGB u leeyahay go'aan gaaris madax-bannaan. Inkastoo magacaabista Guddoomiyaha gobolka ay hadda tahay dhaqan hirgalay, haddana waxaa gudoomiyaha la gudboon in uu mudnaan siiyo danaha dadka deegaanka halkii uu ka shaqeyn lahaa keliya raalli-gelinta DFS.[32]

Xaaladda siyaasadeed ee jirta ayaa hoggaanka DFS siineya awood mug leh ee shaqsiyaadka loo magacaabayo jagooyinka guddoomiyeyaasha iyo ku-xigeennada, kuwaasoo loo adeegsan karo siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaanba. Inkastoo uu MGB bixiyo qeyb muhiim ah oo kamid ah dakhliga DFS, waxa loo qoondeeyay kaliya boqolkiiba 15 ee miisaaniyadda qaranka. Intaa waxaa dheer, qoondeynta ma laha dabagal adag sida hay'adaha kale ee dowladda federaalka. Sidaas awgeed, madaxda DFS waxa ay si fudud uga faa'iideysan karaan miisaaniyadda gobolka Banaadir, sida uu tilmaamay masuul horey uga tirsanaa MGB.[33] Mid kamid ah ku xigeenadii hore ee gobolka ayaa sheegay in haddii DFS ay ujeeddo dhab ah ka leedahay wax-ka-qabashada baahiyaha dadka deegaanka, magacaabista ma noqon lahayn dhibaato, balse dhab ahaan dowladda federaalka dan kama laha adeeg bixinta. Ku-xigeenka hore oo hadalkiisa sii wata ayaa sheegay in sababta kooxdiisa shaqada looga ceyriyay ay ahayd in ay dalbadaeen in dhaqaalaha si cadaalad ah DFS iyo MGB

30 Wareysi lala yeeshay guddoomiye ku xigeenkii hore ee gobolka Banaadir/ku-xigeenka duqa Muqdisho, 17ka Sebtembar 2023.

31 Wareysi lala yeeshay xubin hore ee golaha deegaanka G/Banaadir (2008–2012), [Muqdisho], 8 Sebtembar 2023; Wareysi lala yeeshay guddoomiye ku xigeenkii hore ee gobolka Banaadir/Duqii hore, [Muqdisho], 10ka Sebtembar 2023.

32 Wareysi lala yeeshay guddoomiye ku xigeenkii hore ee gobolka Banaadir/Duqa Muqdisho, [Muqdisho], 10ka Sebtembar 2023.

33 Wareysi lala yeeshay Guddoomiyihii hore ee G/Banaadir/Duqii hore (1998-1999) iyo Duqii Muqdisho (2001-2004), Muqdisho, 7 Sebtembar 2023

u qeybsadaan, isagoo tilmaamay 'in 15% la qoondeeyay sanadkii 2007 xiligaas oo dowladda dhexe iyo MGB ay gacanta ku hayeen dhowr baloog, halka uu hadda MBG maamulo dhammaan 17-ka degmo dadka degganna ay u baahan yihiin adeegyo nooc kasta ah.[34]

Sidoo kale, daciifnimada DFS waxay saameyneysaa qaab-dhismeedka maamul ee MGB, maadaama madaxda qaranka oo ku mashquulsan dhulalka ay kala wareegayaan al-Shabaab iyo ku gacan sareynta hardanka siyaasadeed ay kula jirto dowlad-goboleedyada ay ka dhigan tahay in aanay fiiro gaar ah u yeelaneynin dib-u-habeynta maamul ee gobolka Banaadir. Soo-ifbixii al-Shabaab ayaa tusaale u ah xaaladdan: diiradda dowladda federaalka oo saarneyd ka hortagga argagixisada ayaa horseeday in ay hab militari u wajahdo al-Shabaab halkii hannaan dib-u-heshiin iyo nabad u mari lahayd, maadaama ay nabadda muhiim u tahay horumar kasta oo macno leh oo laga gaaro dimoqraadiyadda dowladaha hoose.

Caqabadaha maaliyadeed iyo kuwa maamul ee aan kor kusoo xusnay waxay tilmaamayaan baahida loo qabo hab dhammeystiran oo aan keliya raadinayn kala saaridda isku-tiirsanaanta maaliyadeed ee jirta, balse abuuraya nidaam awood u siinaya gobolka Banaadir in uu helo maamul madax-bannaan, dakhli uruurin la isku halleyn karo, iyo geeddi-socod dimoqraadiyadeed.

## Ka-gudbidda cakirnaanta maamul

Caqabado siyaasadeed iyo kuwo amni oo isku tagay ayaa hareeyay haykalka maamul ee gobolka Banaadir, waxaana udub-dhexaad u ah Golaha Wadatashiga Qaranka (GWQ). GWQ ayaa guud ahaan loo sameeyay in uu noqdo madal fududeysa is-afgarad siyaasadeed oo dhexmara madaxda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada. Waxa uu sidoo kale golaha kaalin ku leeyahay horumarinta dimuqraadiyeynta, sida in uu May 2023 ku heshiiyey doorashado hal qof, hal cod (HQHC) ah ee ka dhacda heer federaal, heer dowlad-goboleed iyo heer degmo, ee uu gobolka Banaadir kamid yahay. Dhanka kale, heshiiska GWQ, inkastoo uusan dastuuri ahayn, wuxuu dhaliyey xiisado u dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladda. Doorka sare ee GWQ ayaa horseeday in jilayaal kala duwan ay ku tartamaan saameynta golaha, mararka qaarna ay danahooda ka hormariyaan baahiyaha shacabka — oo ay ku jiraan baahiyaha ay qabaan dadka deggan gobolka Banaadir.

34 Wareysi lala yeeshay guddoomiye ku xigeenkii hore ee gobolka Banaadir/Duqa magaalada Muqdisho, 17kii Sebtembar 2023.

**Waa kuwan saddexda qaab maamul ee Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo Guddiga La socodka Baarlamaanka ay usoo jeediyeen Muqdisho waqtiyo kala duwan intii u dhexeysay 2012-2022:**

**Caasimadda Dalka:** Noocan, Muqdisho waxay u shaqeysaa sidii caasimadda Soomaaliya, iyadoo si toos ah u hoos-tageysa Dowladda Federaalka Soomaaliya. Noocan ayaa xaddidaya madax-bannaanida Muqdisho wuxuuna xoojinayaa awoodda maamul ee dowladda dhexe.

**Dowlad-Goboleed:** Muqdisho waxay lamid noqoneysaa dowlad-goboleedyada kale ee Soomaaliya ka jira iyadoo yeelaneysa qaab-dhismeedkeeda maamul ee u gaarka ah. Tani waxay siinaysaa Muqdisho in ay u hesho madax-banaani arrimaha gudaha iyadoo qeyb ka ah nidaamka federaalka.

**Nooc Isku-dhaf ah:** Isku-dhafka labada nooc ee sare, oo Muqdisho ama qeybo ka mid ah magaalada ama degmo ayaa sii ahaaneysa caasimadda federaalka laakiin sidoo kale waxay madax-bannaani u heleysaa arrimaha maamulka gudaha. Tani waxay ku lug yeelan kartaa qaab-dhismeed maamul oo la wadaago ama wadaag gaar ah oo masuuliyadeed oo ka dhexeeya DFS iyo maamulka gobolka.

Xaaladdu waxay sii adkaanaysaa marka la tixgeliyo qaab-dhismeedka dowladeed ee Muqdisho iyo maqaamka ay ku leedahay nidaamka federaalka Soomaaliya. Inkastoo uu qodobka 9-aad ee dastuurka KMG ah uu sheegayo in Muqdisho ay tahay 'caasimadda qaranka', haddana labada gole ee baarlamaanka ayaa looga fadhiyaa in ay soo saaraan sharci gaar ah oo xaqiijinaya arrintan oo qeyb ka ah dib-u-eegista dastuurka. Xubin hore oo golaha deegaanka ayaa hoosta ka xariiqay in 'qaab-dhismeedka dowladeed ee hadda ka jira Maamulka Gobolka Banaadir iyo Muqdisho uu muujinayo nidaam aan fulin karin qodobka 9-aad ee Dastuurka KMG'.[35]

Halkii laga aqbali lahaa maqaamka caasimadda qaranka ee ku qeexan Dastuurka KMG ah, qaar kamid ah dadka aadka u daneeya ee kasoo jeeda beelaha waaweyn ee Muqdisho dega ayaa u ololeynaya in gobolka Banaadir loo aqoonsado dowlad-goboleed.[36] Waxay ku doodayaan, in dadka deegaanka ay wajahaan bixinta 'canshuur aan metelaad lahayn', iyo Maamulka Gobolka Banaadir oo aan lahayn maqam taasoo ka dhigan in aanu metelaad ku lahayn Aqalka Sare, iyo sidoo kale in aanu lahayn madax-bannaanida ay haystaan dowlad-goboleedyada.

Arrimaha kale marka laga hadlayo maamulka ayaa ah in Muqdisho ay martigeliso in ka badan hal milyan oo barakacayaal ah, oo u badan beelaha la heyb sooco, iyo sidoo kale boqollaal kun oo qof oo kasoo jeeda beelaha Hawiye ee aan awoodda badan ku laheyn Muqdisho ee deggan kana shaqeysta magaalada.[37] Xubno ka tirsan beellahan ayaa muujinaya in Muqdisho ay tahay caasimad guud oo ay Soomaali dhisatay ayna leedahay Soomaali, iyadoo tirada dadka

35 Wareysi lala yeeshay xubin hore ee golaha deegaanka gobolka Banaadir (2008-2012), [Muqdisho], 8 Sebtembar 2023.

36 Dadkan ayaa u badan kuwo kasoo kala jeeda beelaha Hawiye ee Abgaal iyo Murusade oo iyagu sheeganaya min ay asal yihiin iyo Habar Gidir oo si weyn uga dhex muuqda magaalada Muqdisho.

37 Markii uu amniga magaalada soo hagaagay, qurbajoog badan, arday, xirfadlayaal u shaqeeya hay'adaha samafalka iyo hay'adaha caalamiga ah, ganacsato badan, hantiileyaal iyo shacab ka yimid magaalooyin kale ayaa dib ugusoo laabtay caasimadda maadaama Muqdisho ay ka fursado iyo adeegyo badan tahay magaalooyinka kale.

ku nool ay korortay oo kaliya markii ay Soomaaliya ku dhawaaqday madax-bannaanida 1960-kii.[38]

Aragtiyadan kala duwan ayaa muujinaya in go'aaminta maqaamka Muqdisho ay saameyn toos ah ku leedahay dimuqraadiyeynta iyo geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka. Inkastoo Dastuurka KMG ah uu si aan mugdi ku jirin u sheegayo in Muqdisho uu maqaamkeeda ah caasimadda qaranka sii ahaan doono inta laga gaarayo heshiis qeexan, siyaasiyiinta ayaan weli dhameystirin maqaamkaas, taasoo Maamulka Gobolka Banaadir ka dhigeysa mid siyaasad ahaan ay dowladda federaalka sii maamusho.

Guddoomiye/Duq hore ee gobolka Banaadir ayaa xoojiyey in loo baahan yahay in la sameeyo istraatiijiyad dhinacyo badan leh si looga gudbo siyaasadda ku saleysan qabiilka loona gudbo hannaan maamul oo Muqdisho ka dhigaysa inay tahay caasimad metesha guud ahaan shacabka dalka. Dhanka kale, tani waxay u baahan tahay xallinta metelaadda beelaha ee Soomaaliya ka jira—wuxuu ku dooday in guddoomiyeyaasha gobolka Banaadir ay ugu horreyn kasoo jeedaan beesha Hawiye maadaama ay magaalada tiro ahaan ku badan yihiin. Dhanka kale, waxaa sidoo kale muhiim ah in la xaqiijiyo in beelaha kale ay metelaad ku dhex helaan maamulka. Guddoomiye hore/Duq hore ayaa tilmaamay in Bern (Switzerland) iyo Canberra (Australia) ay tusaale u yihiin dowlado hoose iyo caasimadda qaranka oo isla shaqeeya, taasoo fikrado ku biirineysa sida Muqdisho ay u sii joogteyn karto maqaamkeeda caasimadeed iyadoo madax-bannaani la siinayo Maamulka Gobolka Banaadir.[39]

Qorshaha Dimuqraadiyeynta Gobolka Banaadir ayaa qeexaya habka loo dhisayo goleyaasha degmooyinka Muqdisho. Ujeedada qorshahan ayaa ah sidii heshiisyo siyaasadeed looga gaari lahaa hannaanka maamul-u-sameynta caasimadda, loona dejin lahaa shuruucyo iyo habraacyo lagu dhisayo maamulka magaalada, iyo in la sameeyo la tashiyo bulsho iyo wacyigelin. Qorshaha dimuqraadiyeynta waxa loo fulin doonaa saddex weji. Wajiga 1-aad wuxuu diiradda saarayaa fahamka xoogagga gudaha iyo dib-u-heshiisiinta siyaasadeed ee la xiriirta caddeynta maqaamka Muqdisho ee caasimadnimo. Wajiga 2-aad ayaa diiradda lagu saari doonaa dhismaha maamulka caasimadda, lagasoo bilaabo heer caasimad, ilaa heer degmo. Ugu dambeyntii, wejiga 3-aad waxa uu diiradda saarayaa dhismaha degmooyinka oo ay kamid yihiin sameynta 17 degmo oo ka tirsan golaha deegaanka ee gobolka.[40]

Ka-qeybgalayaasha aqoon-is-weydaarsiga ansixinta ee daraasadan ayaa u ololeeyay in dib-u-heshiisiinta as ay tahay shardi muhiim u ah isbeddel kasta oo maamul oo la taaban karo oo ka dhaca gobolka Banaadir si wax looga qabto tabashooyinka iyo colaadaha taariikheed ee la xiriira. Haddii aan habkan oo kale lagu darin geeddi-socodka dimuqraadiyeynta, ka qeybgalayaasha ayaa rumaysnaa in taabo-gelinta nidaam dimuqraadi ah oo waara uu xadidnaan doono, sidoo kale haddii aan xal laga gaarin dhacdooyinkii hore waxaa adag in kooxo kala duwan ay ku wada noolaadaan si dimoqraadi ah. Qaar kamid ah ka qeybgalayaasha, ayaa sidaa awgeed, ka digay in isbeddel degdeg ah lagu sameeyo haykalka maamul iyo xaalada hadda ee gobolka Banaadir.[41]

38 Rift Valley Institute and Heritage Institute for Policy Studies, *Land Matters in Mogadishu: Settlement, ownership and displacement in a contested city*, London and Nairobi/Mogadishu: Rift Valley Institute and Heritage Institute for Policy Studies, 2017, 30. https://8v90f1.p3cdn1.secureserver.net/wp-content/uploads/2021/01/Land-Matters-in-Mogadishu-RVI-Rift-Valley-Forum-and-HIPS-2017.pdf.

39 Wareysi lala yeeshay guddoomiyihii hore ee G/Banaadir/Duqii hore (1998-1999) iyo duqii (2001-2004), Muqdisho, 7 Sebtembar 2023.

40 Shir looga hadlayo "Falanqaynta Fursadaha & Caqabadaha Dhismaha Golaha Deegaanka" 25 Sebtember 2023, Muqdisho

41 Shir looga hadlayo "Falanqaynta Fursadaha & Caqabadaha Dhismaha Golaha Deegaanka" 25 Sebtember 2023, Muqdisho

**Wa- k- qabashada qaar kamid ah arrimaha u baahan dib-u-heshiisiinta ee hoos ku xusan waxay muhiim u noqon doontaa ka gudbidda caqabadaha iyo sare-u-qaadida fursadaha la xiriira samaynta golayaasha degmooyinka.**

C**adeynta Doorarka iyo Maamulka:** Waxaa loo baahan yahay qaab-dhismeed sharci oo dhammeystiran oo kala qeexaya mas'uuliyadaha DFS iyo MGB. Tani waxay wax ka qaban doontaa arrinta la xiriira awoodda, waajibaadka, iyo doorarka iskasoo horjeeda.

**Tabashada Taariikheed:** Wax-ka-qabashada arrimaha soo jireenka ah ee dadka ku nool gobolka Banaadir ay dareemeen in ay hoggaanka u hayaan shaqsiyaad aysan dooran. Tani waxay ku lug leedahay in la aqoonsado caddaalad-darrooyinkii hore iyo in la dejiyo habab lagusoo dooran karo mas'uuliyiinta si caddaalad ah oo hufan.

**Siyaasadda iyo Qabiilka:** Xusidda 'xiriirka siyaasadda iyo qabiilka' waxa uu tilmaamayaa kala qeybsanaan hoose oo u baahan wada-tashi iyo wada-xaajood beeleed. Fududeynta wada-hadalladani waxay dhalinaysaa isfahan dhex mara beelaha kala duwan, jilib-hoosaadka iyo siyaasiyiinta iyo sidoo kale abuurista dano, fikrado iyo aragtiyo bulsho.

**Caddeyn Dastuur:** Caqabadaha ku xeeran maqaamka Muqdisho oo ah xarunta dowladda federaalka, caasimadda dalka iyo xarunta gobolka Banaadir ayaa u baahan in la xalliyo. Wada-tashiyada iyo doodaha dadweynuhu waxay gacan ka geysan karaan sidii loo heli lahaa meel dhexe iyo in xal laga gaaro arrintan muddada soo taagneyd.

**Metelaadda Barakacayaasha:** Maadaama dadka barakacay ay tahay in ay xuquuq iyo metelaad ku yeeshaan dowladda, waxaa loo baahan yahay habab loo dhan yahay oo hubinaya in codkooda la maqlo.

**Hababka Xallinta Khilaafaadka:** Maadaama dhisidda golayaasha degmooyinka ay u badan tahay inay horseedi doonto loolan awoodeed iyo isku dhacyo dhici kara, dejinta habab lagu xalliyo khilaafyada ayaa muhiim noqon doona.

**Walaaca dhaqaale:** Wax-ka-qabashada arrimaha sida dakhli uruurinta iyo maareynta miisaaniyadda, gaar ahaan maadaama Muqdisho ay tahay meel dakhli badan soo saarta, ayaa muhiim u ah dib-u-heshiisiinta. Xasilooni dhaqaale iyo wadaag cadaalad ah ee dhaqaalaha ayaa gacan ka geysan doonta in la xalliyo dareenka la xiriira wadaagga dhaqaalaha.

**Tixgelinta Danaha Siyaasadeed:** Qormadan waxa lagu xusay siyaasiyiin dano gaar ah leh oo caqabad ku ah dimuqraadiyeynta. In lala macaamilo siyaasiyiintan, la fahamo tabashooyinkooda, iyo ka shaqeynta hadaf midaysan waa muhiim.

Daah-furnaanta Go'aan-qaadashada: In xoogga la saaro hufnaanta, gaar ahaan kulammada baarlamaanka ee diiradda lagu saarayo maqaamka Muqdisho iyo maamulka gobolka Banaadir, waxay hubisaa in go'aannada la gaarayo ay yihiin kuwo dani ugu jirto shacabka iyo in ay dhexdhexaad yihiin intii suurtagal ah.

**Wacyigelinta Dadweynaha iyo Waxbarashada:** Waxbarasho dadweyne oo joogto ah iyo ololeyaal wacyigelineed ayaa hubin doona in dadka deegaanka ay fahmaan faa'iidooyinka iyo saameynta dhismaha goleyaasha degmooyinka.

Guddoomiye ku xigeenka gobolka Banaadir iyo Agaasimaha Qorsheynta ee gobolka ayaa labaduba carrabka ku adkeeyay sida Maamulka Gobolka Banaadir iyo dowladda federaalka uga go'an tahay geeddi-socodka dimuqraadiyeynta iyo sameynta gole deegaan, taasoo loo arko fursad wanaagsan. Dhameystirka dastuurka ayaa sidoo kale loo arkaa inay fursad u tahay geedi-socodka dimuqraadiyeynta gobolka Banaadir, sababtoo ah qodobka 9-aad ayaa qeexaya sida loo caddeynayo maqaamka caasimadda Muqdisho. Arrin kasoo baxday aqoon-is-weydaarsiga daraasadan[42] ayaa la xiriirtay in hannaanka dimuqraadiyeynta laga billaabo maqaamka Muqdisho iyo doorashada hogaanka gobolka iyo golaha caasimadda, kadibna loo gudbo dhismaha golayaasha degmooyinka. [43]
Dhinaca maamul u sameynta gobolka Banaadir, hoggaanka Maamulka Gobolka Banaadir ee hadda jira, oo kasoo qeyb galay aqoon-is-weydaarsi lagusoo bandhigay daraasaddan, ayaa muujiyay sida ay u door bidayaan daadajin maamul ee kor ka yimaada. Tani waxay la micno tahay in hoggaanka hadda jira uu kormeero hannaan ay oday dhaqameedyada Muqdisho soo magacaabayaan xubnaha golaha deegaanka kumeelgaarka ah ee gobolka muddo hal sano ah. Muddadan kumeelgaarka ah, MGB, oo kaashanaya golahan deegaan, waxay ka shaqeynayaan sidii dhidibbada loogu dhigi lahaa doorashooyin dimuqraadi ah, oo ugu dambeyn si toos ah loosoo doorto duqa magaalada iyo wakiillada gobolka iyadoo loo marayo nidaam doorasho qof iyo cod ah. Waxay ku doodayaan in habkan uu yahay mid sahlan oo si degdeg ah loo hirgelin karo, iyadoo laga fogaanayo in la carqaladeeyo hannaanka awood-qeybsiga ee hadda jira.

Marka la eego maqaamka Muqdisho, hoggaanka Maamulka Gobolka Banaadir waxay door bidayaan qaadashada "Nooca Berlin," oo gobolka Banaadir uu noqon doono dowlad-goboleed metelaad u qalanta ku leh baarlamaanka federaalka Soomaaliya iyadoo Muqdisho ay sii ahaaneyso caasimadda qaranka. Qaabkan ayaa la door bidayaa si looga fogaado xaalad la mid ah "Nooca Washington DC," oo magaaladu ay wajaheyso bixinta canshuurta iyadoo aanay heleynin metelaad ku habboon.

Inkastoo ka qeybgalayaasha aqoon-is-weydaarsiga ay muujiyeen rabitaan siyaasadeed iyo yididiilo, waxay sidoo kale sheegeen caqabadaha kala duwan ee ku gadaaman geeddi-socodka. Waxa ay su'aal ka taagan tahay in ay Muqdisho sii ahaato saldhigga dowladda federaalka: haddii la dhiso dowlad hoose oo lasoo doortay, maxay uga dhigan tahay dhaqaalaha iyo amniga gobolka. Saddex caqabadood oo kale oo lasoo bandhigay ayaa la xiriiray awood qeybsiga, kaalimaha iska hor imaanaya ee jilayaal kala duwan, iyo baahida loo qabo in la helo waqti iyo dhaqaale.

42 Aqoon-is-weydaarsiga ansixinta ayaa loo sameeyay daraasaddan 25-kii Sebtembar 2023 in ka badan 110 kasoo qaybgalayaal ah, oo ay ku jireen daneeyayaal kala duwan, sida guddoomiye hore iyo duqa magaalada, masuuliyiinta dowladda, xubnaha bulshada rayidka ah, aqoonyahanno, siyaasiyiin, khubaro, iyo howl-wadeenno. Mudane Maxamed Axmed Diiriye (Yabooh) Guddoomiye ku xigeenka Maamulka Gobolka Banaadir iyo Wasiiru Dowlaha Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, Saadaad Maxamed Nuur Caliyow, ayaa khudbado ka jeediyay furitaanka shirka oo ku dheeraaday ahmiyadda munaasabadda iyo sida loogu baahan yahay in la iska kaashado horumarinta dimuqraadiyaynta ee MGB. Cabdulqaadir Muxyaddiin Axmed (Dalxa), Agaasimaha Guud ee Qorsheynta Gobolka Banaadir, ayaa sidoo kale soo bandhigay qorshayaasha dimuqraadiyeynta ee Maamulka Gobolka Banaadir.

43 Shir looga hadlayo "Falanqaynta Fursadaha & Caqabadaha Dhismaha Golaha Deegaanka" 25 Sebtember 2023, Muqdisho

# Gunaanad iyo talooyin

Hannaanka dowlad-dhis ee Muqdisho/Banaadir ayaa jooga meel xasaasi ah. Ma fududa in ay dowladda federaalka sii waddo magacaabista madaxda gobolka muddo aan cayinayn, gaar ahaan marka la eego in 85 boqolkiiba dhaqaalaha magaalada uu u xaroodo dowladda federaalka—taasoo ah saami aan waxba iska beddelin tan iyo sanadkii 2007. Sanadihii u dambeeyay, dadka deggan Muqdisho ayaa dalabanayay hannaan maamul oo cadaalad ah.[44]

Dastuur ahaan, madax-bannaanida iyo dimuqraadiyeynta gobolka Banaadir ayaa si cad u qeexan: sida ku cad qodobka 48-aad ee Dastuurka Kumeelgaarka ah ee 2012, waa in maamulka tooska ah ee dowladda federaalka aanu dhaafin labo sano. Haddaba, maamulka dowladda federaalka ee gobolka Banaadir waxa uu aragti ahaan dhamaaday sanadkii 2014. Toban sano kadib, sikastaba ha ahaatee, dib-u-eegista dastuurka la hiigsanayay ayaanan weli la dhameystirin, iyadoo saddexdii doorasho qaran ee lasoo dhaafay ay hareeyeen doodo, musuqmaasuq iyo khilaaf.

Sikastaba ha ahaatee, hoos-u-dhaca ku yimid khatarta al-Shabaab iyo horumarka laga gaaray amniga Muqdisho ayaa u muuqata in ay sii kordhin doonaan dadaallada lagu dalbanayo in Banaadir yeelato gole deegaan oo lasoo doortay. Soo jeedintii May 2023 ee GWQ ee ahayd in la qabto doorasho heer degmo oo qof iyo cod ah marka la gaaro sanadka 2024 ayaa hoosta ka xariiqeysa baahida loo qabo in la helo mas'uuliyiin lasoo doortay, iyadoo xaqiiqda ah in Puntland ay ku guuleysatay in doorashooyin qof iyo cod ah ay ka qabato in ka badan 30 degmo sanadkan 2023 ay sii kordhineyso dareenka ah in xaaladda ka jirta gobolka Banaadir ay tahay mid aan sii socon karin.45 Iyadoo taariikhda casharro laga baranayo, isku daygii 2008 ee dhismaha golaha deegaanka ayaa bar bilow noqon kara. Noocaan metelaad lagu dejiyey xaalad qas iyo qalalaase badan ayaa ah mid xaaladda maanta ku habboon, gaar ahaan marka la eego kala-qeybsanaanta ka jirta siyaasadda Soomaaliya.

Inkastoo ay jiraan caqabado dhowr ah—gaar ahaan xuquuqda degganaanshaha iyo in si habsami ah looga guuro awood qeybsiga beelaha loona gudbo maamul dimoqraadi ah—hal arrin ayaa cad: Dadka deggan gobolka Banaadir waxay dalbanayaan oo ay mudan yihiin in ay helaan mas'uuliyiin ay la xisaabtami karaan. Kaalinta iyo xuquuqaha dastuuriga ah ee dad badan oo barakacayaal ah iyo dadka u arka Muqdisho hoygooda ayaa ah in la tixgeliyo marka la sameynayo nooca doorasho ee lagu dooranayo masuuliyiinta Maamulka Gobolka Banaadir.

Ugu horrayn, baarlamaanka hadda jira waxaa horyaalla go'aanno muhim ah marka ay timaado xulashada mid kamid ah saddexda nooc oo ay soo jeediyeen hay'adaha arrimaha dastuurka—oo ah in Muqdisho/Banaadir laga dhigo: 1) Degmo federaal; 2) Dowlad-goboleed; ama 3) magaalo madax ka tirsan dowlad-goboleed. Go'aankan waa in uu ku saleysnaadaa iskaashi iyo qiimeyn dhab ah, halkii uu noqon lahaa fursad siyaasadeed taasoo horey u carqaladeysay dadaallada dib-u-habeynta. Xiriirka dhinacyada badan leh ee ka dhexeeya Maamulka Gobolka Banaadir iyo dowladda federaalka, isbeddellada joogtada ah ee hoggaanka, iyo khataraha amni ayaa daruuri ka dhigaya tixgelinta hannaan dhinacyo badan leh. Qaab-dhismeed sharci oo adag, rabitaan siyaasadeed ee doorashooyin gole deegaan, iyo dib-u-

44 Somali Cable, 'Shir looga hadlayo xuquuqda gobolka banaadir ayaa lagu qabtay Muqdisho', YouTube, 3 May 2017. Accessed 19 September 2023, www.youtube.com/watch?app=desktop&v=A5FH9GZHtyI.

45 Mohamed Olad Hassan, 'Somalia Holds "Historic" Regional Elections', VOA, 26 May 2023. Accessed 19 September 2023, www.voanews.com/a/somalia-holds-historic-regional-elections/7110115.html.

nidaamin dakhli oo cadaalad ku dhisan ayaa kamid ah arrimaha laf-dhabarka u ah dib-u-habeynta maamulka.

Si kooban, dimuqraadiyeynta gobolka Banaadir waa mid la gaari karo, iyadoo dastuurka, dadaalladii taariikheed iyo dareenka dadweynuhu ay dhammaantood taageerayaan dimoqraadiyeynta gobolka. Haddaba, waa in diiradda la saaraa qorshe hufan iyo istaraatiijiyado wax-ku-ool ah oo hubinaya in isbeddel dimuqraadi ah aanu dib-u-dhac ku imaan ama aanu wajahin caqabato laga baaqsan karo.

## Talooyin ku socda DFS, MGB, Baarlamaanka iyo Horjoogeyaasha siyaasadda

- **Baarlamaanka (iyo GWQ), waxaa looga baahan yahay sameynta qaab-dhismeed sharci oo dhammeystiran:** Dejinta qaab-dhismeed sharci oo faahfaahsan oo u dhexeeya dowladda federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir ayaa muhiim ah si meesha looga saaro madmadowga loona qaabeeyo hannaanka maamul. In la dedejiyo geeddi-socodka dib-u-eegista dastuurka waxay si dhab ah u hagi doontaa noocyada maamul ee Muqdisho ku habboon, iyadoo hubineyso in labada heer ee dowladeed ay shaqeeyaan iyadoo ay kaalintoodu caddahay, maadaama Muqdisho tahay caasimadda dalka una baahan tahay in ay yeelato summad qaran.

- **In Muqdisho laga billaabo dhismaha goleyaal deegaan oo lasoo doortay:** Waa in dowladda federaalka ay mudnaanta siisaa hannaanka dimoqraadiyadda caasimadda ee inta badan laga hadlo balse aan mudnaanta la siin. Marka la eego xaaladda ammaanka ee Muqdisho oo soo hagaagtay, waa wakhti ku habboon in la bilaabo geeddi-socodka dimuqraadiyeynta (waa mid aruurineysa marka laga soo tago doorasho), iyadoo dadka deegaanka loo oggolaanayo in ay doortaan wakiiladooda, kuwaa oo si hufan loogu maamulo, si loo kordhiyo isla-xisaabtanka dowladaha hoose.

- DFS iyo DXDF, **waxaa looga baahan yahay in ay qeexaan kaalinta Golaha Wadatashiga Qaranka**: Waa in GWQ uu ugu horreyn noqdaa dhexdhexaadiye, fududeeya is-afgarad dhex mara madaxda heer qaran iyo heer gobol. Iyadoo la xaqiijinayo in go'aannada dowladeed ay waafaqsan yihiin dastuurka, arintan waa inay keentaa sameynta qaab-dhismeed dowladeed oo ku saleysan sharciga, xaqiijinayana go'aan-qaadasho hufan oo cadaalad ah.

- Hoggaanka DFS**, waxaa looga baahan yahay dib-u-qoondeynta dakhliga:** Maadaama uu Maamulka Gobolka Banaadir noqonayo mid madax-bannaan, waxaa lama huraan ah in qoondeynta dakhliga la kordhiyo. Kordhinta qoondada dakhliga gudaha ee Maamulka Gobolka Banaadir oo la gaarsiiyo ugu yaraan 25% marka la sameeyoa goleyaasha deegaanka ee lasoo doortay waxay hubineysaa in ilaha dhaqaale ee gobolka uu la jaanqaado masuuliyadda dadka la doortay iyo himilooyinka bulshada.

- Hoggaanka MGB**, waxaa looga baahan yahay daah-furnaan maaliyadeed:** Si loo helo kalsooni ballaaran loona hubiyo in lacagaha si cadaalad ah loo isticmaalo, waa in Maamulka Gobolka Banaadir uu isticmaalaa hababka maareynta maaliyadeed ee caalamiga ah. Hirgelinta habab adag ee lagu maareeyo maaliyadda waxay xaqiijineysaa daah-furnaanta, waxayna kalsooni ku abuureysa bulshada marka si daahfuran loo maareeyo lacagaha ay bixiyaan.

- Daneeyeyaasha siyaasadda, ha ahaadaan DFS, GWQ ama MGB**: Ka fogaada Ka Faa'iideysiga Siyaasadeed**: Waxaa muhiim ah in laga shaqeeyo danta gobolka, lagana fogaado go'aannada ku saleysan faa'iideysiga siyaasadeed ee muddada dhaw. Hab sal-ballaaran, oo aan eex lahayn oo u dhexeeya dowladda federaalka, dowlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir iyo kooxaha kale ayaa xaqiijin kara dib-u-habeyn muddada fog ah oo waarta oo ay ka faa'idaan guud ahaan gobolka Banaadir.

- **Dhamaan Daneeyeyaasha, Cashar ka barta hababkii hore:** Haddii marka la gaaro 2024 aanu Maamulka Gobolka Banaadir u gudbin nidaam doorasho qof iyo cod ah, waxaa habboon in la tixgeliyo qaab-dhismeedkii golaha deegaanka ee hore. Habkii loo sameeyay golaha deegaanka sanadkii 2008, tusaale ahaan, waxa uu muujinayaa in uu ahaa qorshe tixgelinayo caqabadaha gaarka ah ee gobolka Banaadir iyadoo la isku dayayo in sare loo qaado ka-qeybgalka ballaaran ee bulshada.

- **Dhamaan jilayaasha siyaasadda: si deggan u daraaseeya doorashooyinka MGB:** Nooc kasta oo maamul oo auu MGB dooto, metelaadda Maamulka Gobolka Banaadir waa in ay noqotaa mid loo-dhanyahay, oo ay ku jiraan codadka shacabka asalka ah, barakacayaasha, iyo kuwa dhawaan yimid Muqdisho. In Muqdisho loo aqoonsado inay caasimad u tahay Soomaalida oo dhan waxay xaqiijinaysaa qaabeynta haykal dowladeed oo loo dhan yahay.

- **Hogaanka Baarlamaanka: Sameeya Kulamo Baarlamaan Daah-furan Loona Dhanyahay:** Doodaha baarlamaanka ee ku saabsan Muqdisho iyo mustaqbalka Maamulka Gobolka Banaadir waa in loo qabtaa si daah-furan, taasoo kor u qaadeysa kalsoonida shacabka. Kulamo wadajir ah oo u dhexeeya labada aqal ee baarlamaanka, lagana hormariyey wadatashi dadweyne, ayaa xaqiijin kara in mustaqbalka gobolka laga galo doodo dheelitiran, loona dhanyahay.

- **Dhamaan daneeyeyaasha: U sameeya geeddi-socodka dimuqraadiyeynta hab lagu xalliyo khilaafyada**: Geedi-socodka dimuqraadiyeynta ayaa mararka qaarkood, si aan ku-talagal ahayn u abuuri kara xiisado. Si looga hortago khilaaf dheeri ah, waxaa lama huraan ah in la sameeyo hannaan si degdeg ah wax uga qabto khilaafyada ka dhasha dimuqraadiyeynta Muqdisho. Tallaabadan waxay hubinaysaa kala-guur fudud waxayna yareyneysaa caqabado iman kara, sida lagu xoojiyey aqoon-isweydaarsiga ansixinta daraasaddan.

## Xuquuq

Faalladan qotada-dheer waxaa soo saaray Somali Dialogue Platform.

Somali Dialogue Platform waa barnaamij Soomaalida ka taageera sidii loo gaari lahaa is-afgarad ku saabsan arrimaha la isku haysto ee siyaasadeed waxaana fuliya Machadka Rift Valley. Somali Dialogue Platform waxaa maalgeliya Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya (SSF) III.

Aragtiyada faallada kama turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya (SSF) III. Platform-ku wuxuu leeyahay madaxbannaanida tifaftirka warbixinnaddiisa oo dhan.

MachadkaRift Valley wuxuu ka shaqeeyaa bariga iyo bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo loo adeegsan karo horumarinta arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.

Xuquuqda daabacaadda © Machadka Rift Valley 2023.

Warbixintan waxaa la daabacay iyadoo la adeegsanayo Creative Commons Attribution NonCommercial-NoDerivatives License (CC BY-NC- ND 4.0).